

Hab dhaqanka aan bulshada ku haboonayn

Tallaabo sharci ah

Waxaanu qaadi doonaa tallaabo sharci ah haddii habdhaqanka aan bulshada ku haboonayni uu sii socdo kadib markaanu ka qaadnay tallaabada ku haboon si aanu u joojino, ama haddii aad khatar ku jirto.

Waxa kale oo aanu isticmaalnaa heshiisyada habdhaqanka la aqbali karo (ABCs). Heshiisyadu waa qaar mutadawacnimo ah waxaana la isticmaalaa marka uu qof ku ballanqaado inuu joojiyo inuu u dhaqmo si aan bulshada ku haboonayn. ABCs sharci ahaan lama fulin karo laakiin waxa loo isticmaali karaa sidii caddayn oo kale hadhow maxkamadda gudaheeda.

Taageeridda markhaatiga

Waanu taageeri doonaa adiga iyo qofkii markhaati ahba.

Waxa kale oo aanu kaga caddaynaa maxkamadda waxaanuna markhaatiyaasha ka caawinaa inay caddayn bixiyaan haddii ay nooga baahdaan.

Maxaa kadib dhaca?

Waraaq ayaanu kuu soo qori doonaa si aanu u xaqiijino in warbixintaadii ahayd habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn waanaanu kula socodsiiin doonaa horumarkayaga. Waxaanu samayn doonaa wax kasta oo aanu samayn karo si aanu uga hortagno dhacdooyin dheeraad ahi inay dhacaan.

Sida loo soo sheego habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn

- Nagala soo hadal telifoonka

020 8709 4300 ama soo booqo xaffiiskayaga ku yaalla 409-403 Mile End Road, London, E3 4PB.

- la xidhiidh waaxda habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn ee dawladda hoose.

Tower Hamlets: Telifoonka lacag la'aanta ah 0800 917 5918 (24ka saacadood)

Newham: 0800 731 3300 (24ka saacadood)

Hackney: 020 8356 3030 (8am illaa 8pm Isniin illaa Jimce iyo 9am illaa 1pm Sabtiyada)

- La xidhiidh bilayska, haddii aad isleedahay khatar ayaad ku jirtaa ama haddii aad caawimo degdeg ah u baahantahay, wac 999.

- Haddii aad u baahantahay talo dheeraad ah, fadlan nagala soo hadal telifoonka 020 8709 4300.

Macluumaad dheeraad ah

Adeegga Dhexdhexaadinta ee Tower Hamlets
Telifoon 020 7702 8305 ama booqo www.thms.org.uk.

Taageeridda dhibanaha
La soo hadal khadka caawimada ee qaranka 0845 30 30 900 ama booqo www.victimsupport.org. (Xaffiiska Tower Hamlets – Telifoon 020 8981 8421 ama emailka vsupport@talk21.com)

Haddii aad doonayso nuqulka siyaasadda iyo nidaamka habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn, fadlan weydii kooxdayada adeegga macaamiisha.

You can ask for this leaflet in large print, on audio tape or in another language. Please contact us on 020 8709 4300.

আপনি এই লিফলেটটি বড় ছাপায়, অডিও টেপে বা অন্য যে কোন ভাষায় পেতে পারেন। দয়া করে আমাদের সাথে যোগাযোগ করুন ০২০ ৮৭০৯ ৪৩০০ নম্বরে। [Bengali]

Waxaad dalban kartaa warqaddan oo ku daabacan farta waawayn, iyadoo ku duuban cod ama ku tarjuman luqadaha beesha. fadlan nagala soo xidhiidh telefoonka ah 020 8709 4300. [Somali]

Możesz poprosić o tę ulotkę drukowaną dużą czcionką, w postaci zapisu audio lub w innym z języków społeczności. Skontaktuj się z nami pod numerem telefonu 020 8709 4300. [Polish]

Quý vị có thể xin tờ rơi (tờ thông tin) này bằng khổ chữ lớn, bằng ghi âm hoặc tiếng nói khác trong cộng đồng. Xin vui lòng liên lạc với chúng tôi, điện thoại số 020 8709 4300. [Vietnamese]

你可要求這份單張的大字印刷本、錄音或其他社區語言的版本，請致電 020 8709 4300 與我們聯絡。 [Chinese]

آپ یہ کتابچہ بڑے حروف، آڈیو یا کسی دوسری کمیونٹی زبان میں طلب کر سکتے ہیں۔ براہ مہربانی ہم سے فون نمبر 020 8709 4300 پر رابطہ کریں۔ [Urdu]



Awarded for excellence



INVESTOR IN PEOPLE



North River Alliance

Gateway Housing Association

409-413 Mile End Road, London, E3 4PB

Residents: 020 8709 4300

General enquiries: 020 8909 4409

Fax: 020 8709 4400

Email: enquiries@gatewayhousing.org.uk

www.gatewayhousing.org.uk

Waraaqdani waxay ku siinaysaa macluumaad ku saabsan adeegyada aanu ku siin doono. Waraaqdani ma saamayn doonto xuquuqahaaga lagu sharxay heshiiskaaga deganaanshaha. Aad ayay u mahadsanyihiin dhammaan dadka deggan ee gacanta ka geystey soo saaritaanka waraaqdan.



Antisocial behaviour
– Somali translation

Masuuliyadahaaga

Maadaama aad tahay qof ka mid ah dadka deggan guryaha Gateway, adiga ayaa masuul ka ah sida aad u dhaqmayso iyo siday u dhaqmayaan carruurta iyo dadka waaweyn ee kula nool adiga ama ku soo booqanaya.

Heshiiskaaga deganaanshuhu wuxuu sheegay ‘inaanad u dhaqmin si ku sababaysa ama laga yaabo inay sababto haddidaad, dhibaato ama cadho dadka kale’.

Tallaabo ayaanu ka qaadi doonaa qof kasta oo jebiya heshiiskooda deganaanshaha ama kirada. Nuqul ah heshiiskaaga deganaanshaha ama kirada, kala soo xidhiidh kooxdayada adeegga macaamiisha telifoonka 020 8709 4300.

Tallaabooyin badan oo kala duwan ayaanu qaadi karnaa si aanu uga hortagno hab dhaqanka aan bulshada ku haboonayn. Tan waxa ka mid noqon karta tallaabo sharci ah, qabanqaabinta taageero, dhexdhexaadin, la shaqaynta bilayska iyo hay’adaha kale, iyo isticmaalidda heshiisyada habdhaqanka la aqbali karo.

Waxa kale oo aanu tallaabo ka qaadi karnaa dadka aan ahayn dadka deggan guryahayaga. Dadka ku nool guryo ay iyagu iska leeyihiin waa la taxaabi kartaa haddii ay u dhaqmaan si aan bulshada ku haboonayn.

Waxaanu ku ballanqaadaynaa inaanu wax ka qabano habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn.

Waxa aanu samayn doono

Waxaanu:

- baadhi doonaa dhammaan dacwadaha oo aanu si dhab ah u qaadan doonaa;
- kaga jawaabi doonaa dacwadaha maalin gudaheed;
- kugu waraysan doonaa:
 - maalin gudaheed haddii ay degdeg tahay (tusaale ahaan, dagaal jidhka ah); ama
 - shan maalmood gudahood arrimaha aan degdegga ahayn;
- isla shan maalmood gudahood marka lagu waraysto, ayaanu isku deyi doonaa inaanu waraysano qofka masuulka ka ah habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn;
- isticmaali doonaa tallaabooyin sharci ah oo ku haboon ama tallaabooyin kale si aanu wax uga qabano dadka sii wada inay u dhaqmaan si aan bulshada ku haboonayn;
- kaala hadli doonaa muddooyinka iskuna waafiqi doonaa sida xaaladda wax looga qabanayo;
- hayn doonaa diiwaan qoraal ah oo ah wixii tallaabo ah ee aanu qaadno, kuuna soo diri doonaa macluumaadka ku haboon iyo qofka masuulka ka ah habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn;
- dib u eegi doonaa kayskaaga bil walba ugu yaraan saddex bilood; iyo
- kuu soo qori doonaa waraaq dhammaadka kayska waxaanuna ku weydiin doonaa sida aad ugu qanacsantahay jawaabta.

Waxa kale oo aanu:

- isku deyi doonaa inaanu xallino khilaafaadka u dhexeeya jaarka;
- la shaqayn doonaa bilayska iyo hay’adaha kale si aanu u joojino habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn;
- taageeri doonaa dhibaneyaasha iyo markhaatiyada habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn;
- la shaqayn doonaa dadka deggan si aanu u abuurto beelo intan ka ammaan badan;
- wax kaga qaban doonaa dacwadaha muddooyinka lagu dejiyey siyaasadayada iyo nidaamka habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn;
- taageeri doonaa mashaariicda si aanu wax uga barno dadka maxaliga ah habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn; iyo
- kula soo socodsiin doonaa horumarkayaga wax ka qabashada dacwaddaada.



Tallaabada aad qaadi karto

La hadal qofka dhibaataada sababaya. Mararka qaarkood inay ficiladoodu ka cadhaysiinayaan dadka kale, markaas u sharax in siday u dhaqmayaan ay kaa cadhaysiinayso.

- Ha cadhoonin.
- Ka sii feker marka hore waxaad doonayso inaad tidhaahdo.
- U sharax sababta ay siday u dhaqmayaan kaaga cadhaysiinayso.
- Dhegeyso aragtidooda – waxa laga yaabaa inay qiil haystaan.
- Cadho yaanay ku qaadin ama ha qaylin.
- Isku day inaad gaadhaan heshiis labadiinuba aad ku qanacsantihiin.
- Ha la murmin – ka dhaqaaq

Heerarka wax ka qabashada habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn

Heerka 1aad – Dhexdhexaadin
Waxaanu kaa caawin karnaa inaanu dhibaatooyinka kala hadalo adiga iyo qofka masuulka ka ah habdhaqanka aan bulshada ku haboonayn. Waxa kale oo aanu kayska u gudbin karnaa adeegga dhexdhexaadinta ee madaxabanaan.

Heerka 2aad – Soo ururinta caddayn
Haddii dacwadda aan lagu xallin Karin wada hadal, waxaanu u baahan doonaa inaanu soo ururino caddayn ah in habdhaqanka aan bulshada ku haboonayni uu dhacay.

Heerka 3aad – Qaaditaanka tallaabo dheeraad ah
Haddii ay caddayntu muujiso in uu qof u dhaqmay si aan bulshada ku haboonayn, waxaanu ka qaadi doonaa tallaabada ku haboon.

Waxaad xaq u leedahay inaad u noolaato sida aad doonayso, haddii aanay saamaynaynin dadka kale. Tan macnaheedu waxa weeye inaad aqbasho oo ixtiraanto baahiyaha iyo doorashooyinka dadka kale.

Waa maxay habdhaqanka aan bulshada ku haboonayni?

Waxaanu ku qeexnaa habdhaqanka aab bulshada ku haboonayni inuu yahay habdhaqanka sababa haddidaad, dhibaato iyo cadho uu u keeno qof ama in ka badan, ama waxyeela hanti.

Tusaaleyaasha waxa ka mid ah:

- dhibaato sanqadh ah;
- cay afka ah, haddidaad, hanjabaad iyo habdhaqan cabsigelin ah;
- dhacdooyinka ah cunsurinimo ama nacayb (ku salaysan quruunta qofka, sinjigiisa, diintiisa iwm);
- khilaafyada u dhexeeya jaarka;
- dhibaato uu keeno xayawaanka la rabbaysto iyo xayawaanadu, ee ay ka midka yihiin saxarada goobaha dadweynaha;
- aalkolada, maandooriyeyaasha, si xun u isticmaalidda maandooriyaha iyo ka baayacmushtaraynta maandooriyaha;
- qalalaasaha guriga iyo faraxumaynta;
- dagaal jidhka ah (oo aan ahayn ka loo diiwaangeliyey sida qalalaasaha guriga);
- wax jejebin iyo waxyaabaha gidaarada lagu qoro;
- qashin, xashiis iyo qashin ku daadin (si sharci darro ah qashin ugu daadin);
- dhibaato beerta ah (tusaale ahaan doogga oo ku baxa);
- si xun u isticmaalidda meelaha la wadaago iyo goobaha dadweynaha (tusaale ahaan, kooxo dhalinyaro ah oo istaagaya waddooyinka la wadaago iyo goobaha dadweynaha);
- dhilaysiga, ficilada galmada ah iyo terisaadda; iyo
- habdhaqanka kale ee dembiga ah ama dembi aan kor lagu sharxin.